Xaqiiqooyinka Tallaalka ee Bulshooyinka Diimaha Hinduuga haysta

Maxay hoggaamiyayaasha diintu ka dhaheen anshaxa qaadashada tallaalka?

"*Lokah Samastah Sukhino Bhavantu*" Ducadan Hinduuga ah ee guud macnaheedu waa – "Dadka oo dhan meel kasta ha joogaane waxaan ugu ducaynaynaa farxad iyo xorriyad, fekerkayga, erayadayda, iyo afcaasha noloshayduna ay si uun gacan ugu yeeshaan farxaddaas iyo xorriyaddaas cid kasta haysato."

Kadib dib-u-eegis aan ku samaynay xogta jirta, waxaanu ku talinaynaa in dhammaan shakhsiyaadka mutaystay ay isku dayaan inay qaataan tallaalka socda si ay naftooda u ilaaliyaan oo sidoo kale u ilaaliyaan bulshada oo dhan. – Chinmaya Mission Portland

Aragtida Dharmic iyo dadka khudaarta cuna

Labada tallaal ee mRNA-ga ah ee Maraykan laga heli karo — **Pfizer-BioNTech iyo Moderna** — lagama samaynin unugyada uurjiifka.

Ma jiraan wax unugyada uurjiifka ah oo loo isticmaalay in laga sameeyo tallaalada, taasoo la micna ah ma jiraan wax unugyada uurjiifka ah oo ku jiro cirbada aad heshid, lagumana isticmaalin unugyada uurjiifka hannaanka soosaaridda. Fayrasyadu waxay u baahan yihiin unugyo nool si ay u koraan. Cilmi-baarayaashu waxay soosaareen "unug beerid" ah unugyo nool kuwaasoo iskood ugu tarma si bilaa xisaab ah shaybaarka, waxaana loo isticmaalaa in lagu koriyo fayrasyada. Xilligii hore wejiga cilmi-baarista ee tallaaladaan COVID-19, beerid unug uurjiif ayaa la isticmaalay si loo tijaabiyo in maaddada fircircoon, oo ah qurubka hiddo-wadaha (messenger RNA), sidii loogu talogalay uu u shaqeeyay. Tijaabooyinku waxay muujiyeen in qurubka hiddo-wadaha, markii la baray unugyada aadanaha, uu soo saaro borotiinka fayraska ah ee inaga dhigaya inaynu samaysanno difaac ka dhan ah fayraska keena COVID-19.

Tallaalada **Moderna iyo Pfizer-BioNTech** ee Maraykanka kuma jiraan maadooyin ka soo jeeda xayawaanka. Kuma jiraan baddeecooyin doofaarka ama lo' tallaaladan. Waxay ka samaysan yihiin qurubyada hiddo-sidaha, biyo, sonkor, cusbo iyo baruur (dux) aan ka soo jeedin xayawaan.

Tallaalka kale, **Johnson & Johnson** wuxuu isticmaalaa fayras ("Adenovirus 26") aan iskiis u tarmi karin. Marka fayraskan la baro unugyada aadanaha, waxay soosaaraan borotiinka fayraska oo la mid ah sida kuwa tallaalada kale, taasi oo innaga dhigta inaynu u yeelano difaac COVID-19. Soosaaridda tallaalkan fayras wuxuu u baahan yahay isticmaalka "beeridda unugyada uurjiifka" ama in unugyo lagu beero shaybaarka kuwaasoo ka yimid unugyo uurjiif oo hore oo ka soo jeeda 1970-nadii, gaar ahaan PER.C6 si loo soosaaro qeybiye fayras kaasoo loogu baahan yahay tallaalka, laakiin tallaalka ugu dambeeya kuma jiro unugyada uurjiifka ama unugyo la beeray.

Waa maxay beerista unugyada uurjiifka? Unugyada uurjiif ayaa lagu koriyaa ama "beeraa" sheybaarada ee unugyada asal ahaan laga soo qaaday unugyada uurjiifka. Uma kori karaan si xad-dhaaf ah. Soosaarayaasha tallaalka COVID-19 waxay isticmaaleen laba unug beeris oo hore marka la tijaabinayo ama la soosaarayo tallaalada:

- HEK-293 — Beerid unug kelyeed kaasoo laga go'doomiyey uurjiif qiyaastii 1972
- PER.C6 — Beerid unug retiineed (retina) kaasoo laga go'doomiyey uurjiif dhicis ah 1985

Soosaaridda tallaalada ku tiirsan unugyadaan la abuuray uma baahna ilmo soo xaaqitaan cusub, maxaa yeelay unugyada laftooda ayaa si aan xad lahayn ugu korayo shaybaarka. Shaxdan waxay taxaysaa tallaalada COVID-19 qaarkood marka la soosaarayo iyo haddii iyo sida ay ugu isticmaalaan unugyadan la beerayo wakhti ka mid ah hannaanka soosaariddooda. Hase yeeshee waxaa muhiim ah in la xasuusnaado, in tallaalada laftooda aysan ku jirin unugyada uurjiifka ee la beeray.

Su’aalaha inta badan la isweydiiyo

Tallaalku ma ammaan baa? Haa. Maamulka Cuntada & Daawada (FDA) waxay u baahan yihiin tijaabinta badqabka oo adag kahor inta aysan ansixinin wax tallaal ah. Tobanaan kun oo dad ah — oo ay ku jiraan Reer Oregon — oo kala leh asalo iyo da' kala duwan, iyo bulshooyinka midabka leh, ayaa kaqeybqaatay tijaabinta tallaalka. Daraasadahaan waxa loo sameeyay in la hubiyo in tallaaladu ay buuxiyeen shuruudaha badqabka oo ay cudurka ka difaacayaan dadka da'aada, jinsiyadaha iyo qowmiyadaha kala duwan leh.

Ma ammaan baa inaan qaato tallaalka COVID-19 haddii aan qabo xaalad caafimaad oo ku lammaan cudurka? Haa. Tallaalka COVID19 wuxuu si gaar ah muhiim ugu yahay dadka xanuunada kale qaba sida wadne xanuunka, sambab xanuunka, sonkorowga iyo cayilka. Dadka xaaladdan ku sugan waxay aad ugu dhaw yihiin inay aad ula xannuunsadaan COVID-19. Dadka qaba xaaladahaan caafimaad ayaa sidoo kale qayb ka ahaa cilmi-baarista tallaalka.

Ka waran waxdhimaalada? Sida laga soo xigtay FDA, waxdhimaalada ugu badan ee tijaabooyinka tallaalka COVID-19 waxaa ka mid ah xanuun, guduudasho ama bararka goobta durriinka, daal, madax-xanuun, qarqaryo, murqo-xanuun iyo kalagoys xanuun. Falcelinadaan waxay ka dhigan yihiin in tallaalku ka shaqaynayo inuu ka caawiyo jirkaaga inuu baro sida loola dagaalo COVID-19 haddii aad u-baylah noqoto. Dadka intooda badan, waxdhimaaladaan waxay hayn doonaan wax aan ka badnayn dhawr maalmood. Haddii aad qabto wax tabashooyin ah, wac dhakhtarkagaa ama kalkaalisadaada caafimaadka. Ma ku jiraa aalad dabagal gudaha tallaalka si markaa dawladdu ay ula socoto dhaqdhaqaaqayga? Tallaallada COVID-19 kama koobna aalad dabagal si dadka loola socdo. Sanduuqyada shixnadaha tallaalka ayaa loola socdaa, sida shixnadaha kale, si loo hubiyo in laga qeybiyo halka looga baahan yahay iyo si looga hortago xatooyada. Waxaa kale oo jira diiwaanka halka aad ka qaadatay tallaalkaaga si loo hubiyo inaad hesho dhammaan garoojooyinkaaga.

Tallaalku miyuu ammaan u yahay haweenka uurka leh ama naasnuujinaya? Inkastoo wali tallaaladu aan la daraaseynin saamaeynta ay u leeyihiin uurka, kama koobna fayrasyo noolnool, oo xeeldheerayaashu waxay ku talinayaan tallaalada in wejiyada oo dhan la qaato, uurka kahor, xilliga uurka iyo uurka kadib. Intaas waxa dheer, haweenka uurka leh waxay u dhaw yihiin inay aad ugu xanuusadaan COVID-19 marka loo eego haweenka aan uurka lahayn, waxayna aad ugu dhaw yihiin in isbitaal la dhigo iyo inay u baahdaan in la dhigo qaybta daryeelka xooggan. Sababahaan dartood, Xarumaha Xakamaynta iyo Kahortagga Cudurrada (Centers for Disease Control and Prevention, CDC) waxay ku talinayaan in tallaalada COVID-19 la siiyo dadka uurka leh. Sidoo kale, inkastoo aan xog laga hayn tallaalada COVID-19 ee haweenka ilmaha naasnuujiya, lama filayo inay halis ku yihiin dhallaanka la naasnuujiyo, marka dadka naasnuujinaya ilmaha waxay dooran karaan in la tallaalo. Haddii aad qabtid su'aalo dheeraad ah oo ku saabsan is tallaalida, waxaa fiican inaad kala hadasho daryeel-bixiyahaaga caafimaad. Wax badan oo ku saabsan uurka iyo tallaalada COVID-19 ka ogow halkan.

Helitaanka dukumiintiga: Shaqsiyaadka naafada ah ama shakhsiyaadka ku hadla luuqad aan aheyn Ingiriiska, OHA waxay ku bixin kartaa warbixinta qaabab kale oo dadban sida fasiraadaha, daabicida farta waaweyn, ama farta indhoolayaasha. Kala xiriir Xarunta Macluumaadka Caafimaadka 1-971-673-2411, 711 TTY ama COVID19.LanguageAccess@dhsoha.state.or.us